



## Warbixinta

### **Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 41<sup>aad</sup>**

*(From 12 October 2019 to 14 December 2019)*

*January 2020*

## ***Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL***

### ***Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 41<sup>aad</sup>***

<b>No</b>	<b>Kal-fadhiga</b>	<b>Taariikhda uu furmay</b>	<b>Taariikhda uu xidhmay</b>
1.	41 <sup>aad</sup>	12/10/2019	14/12/2019

**M**udanayaal,

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhiga 42<sup>aad</sup> ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore, inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 41<sup>aad</sup> oo dhamaystiran si aad u xasuusataan waxyaabihii inoo qabsomay iyo wixii inaga baaqday ee ku qorshaysnaa Ajandihii kal-fadhigii hore.

Kal-fadhigii 41<sup>aad</sup> ee Golaha waxa u qabsomay waxyaabo badan oo aad u muhiima kuwaas oo ay ugu waynayeen Ansixintii Xeerarka, Doodo uu Goluhu ka yeeshay Xaaladda dalka, Ansixintii Odooroska Miisaaniyada 2020ga, safaro dibada loogu baxay iyo Wufuudo ajaanib ah oo Goluhu la kulmay, Waxyaabihii Gudiyadda iyo Maamulka Golahaba u qabsomay si aynu u dardargalino shaqada inoo qorshan ***kal-fadhigan 42<sup>aad</sup>***.

### **Warbixinada Golaha laga hor akhiraayay.**

<b>Tar.</b>	<b>Warbixinta</b>	<b>Cid akhridey</b>
15/10/2019	Warbixinta Shirgudoonka	Mr. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle
15/10/2019	Warbixinta Gudidda Arimaha Dibada ee Golaha Wakiilada	Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe) Gudoomiyaha Gudida
19/10/2019	Warbixinta Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiilada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiyaha Xigeenka Guddida Joogtada iyo Anshaxa
25/11/2019	Warbixinta Gudida Dhaqaalaha ee Miisaaniyada 2020-ka	Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne) Gudoomiyaha Guddida
02/12/2019	Warbixinta Xisaab-xidhka 2017-ka ee Gudidda Daba Galka iyo Ilaalinta Hantida Qaranka	Md. Ibraahim Mahdi Buubaa Gudoomiyaha Guddida

## Xeerarka uu Goluhu Ansixiyay.

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
1.	Ansixinta Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta Ciidamada	27/10/2019	Golaha Guurtida
2.	Ansixinta Wax-ka beddelka Xeerka Nidaamka Garsoorka	23/11/2019	Madaxweynaha
3.	Ansixinta Xeerka Garyaqaanka Guud	01/12/2019	Golaha Guutida
4.	Ansixinta Xisaab-xidhka 2017-ka	08/12/2019	Madaxweynaha
5.	Ansixinta Wax-ka beddelka Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka	09/12/2019	Madaxweynaha

## Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay.

### B. Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Cabdirashiid Maxamuud Cali (Cabdirashiid Riyo-raac)	Xubin komishanka Doorashooyinka Qaranka.	12/11/2019
2.	Md. Maxamuud Daahir Jaamac	Xubin komishanka Doorashooyinka Qaranka.	12/11/2019
3.	Md. Mustafe Maxamed Daahir	Xubin komishanka Doorashooyinka Qaranka.	12/11/2019
4.	Mrw. Kaltuun Xassan Cabdi	Xubin komishanka Doorashooyinka Qaranka.	12/11/2019
5.	Cabdiraxmaan Maxamed Ismaaciil (Duxood)	Xubin komishanka Doorashooyinka Qaranka.	12/11/2019
6.	Md. Xassan Yuusuf Ducaale	Xubin komishanka Doorashooyinka Qaranka.	12/11/2019

### T. Ansixinta Wasiirada Xukuumada.

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Maxamed Muuse Diiriye	Wasiirka Waasarada Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-galinta	17/11/2019
2.	Md. Axmed Xassan Nuur	Wasiir ku Xigeenka Wasaarada Wax-barashada	17/11/2019

## Ansixinta Odooroska Miisaaniyada Ee 2020-ka

**29 November 2019kii** Waxa Golaha Wakiilada la horkeenay odooroska Miisaaniyada Qaranka ee sanadkii 2020, Waxana Warbixinta Miisaaniyadaas ka hor akhriyay Golaha Wasiirka Wasaarada Maaliyada **Dr. Sacad Cali Shire** oo Guud ahaan uga warbixiyay Xildhibaanada Xogta ay xambaarsan tahay Odooroska Miisaaniyada 2020ka

Miisaaniiyad sannadeedka 2020-ka ayaa Wasiirku sheegay in cadadkeedu dhan yahay **2,751,304,880,098 (Laba Tiriliyan, Toddoba boqol kow iyo konton Bilyan, daddex boqol iyo afar milyan, siddeed boqol iyo siddeetan kun iyo siddeed iyo sagaashan shilin)**, waxana ay **18% (Boqolkiiba siddeed iyo toban)** ka badan tahay miisaaniyad-sannadeedkii 2019-ka.

Intaas ka dib, waxa sidii caadadu ahayd lagu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada si ay waajibkooda sharci uga soo gutaan Golahana warbixin uga soo siiyaan Miisaaniyada, iyadoo Gudiddu markii lagu wareejiyay Miisaaniyada soo baadhay isla markaana su'aalo ka soo waydiisay hay'addaha qaarkood sida Wasaarada Maaliyada, waxayna Warbixintooda iyo soo jeedimo ay Golaha u soo gudbiyeen **25/11/2019**. Intaas ka dib, wuxuu Goluhu Miisaaniyada ka yeeshay dood dheer iyo falanqayn.

Waxaana ugu dambeyntii Golaha Wakiiladu Odooroska Miisaaniyada 2020 oo wax ka badal iyo kaabis ay ku sameeyeen Ansixiyeen **30/11/2019**.oo Fadhiga Golaha ay ka soo xaadireen 51 Mudane, waxana Ansixinta Miisaaniyada oo la raaciyay soo jeedimaha ogolaaday 42 Mudane, waxaana diiday 7 Mudane, halka 1 Mudane uu ka aamusay, sidaasna wuxuu Goluhu ku meelmariyay Ansixinta Odooroska Miisaaniyada Sanadka 2020ka.

## Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah.

### B. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan.

No	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
3.	Wax ka badalka Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
4.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
5.	Wax ka badalka Xeerka Doorashada Guud & Diiwaanglainta	Gudidda Arrimaha Gudaha
6.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
7.	Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka
8.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal: -

1.	Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka	(Madaxtoyada ka soo noqdey)
2.	Wax-ka beddelka Xeerka Tamarta	(Madaxtoyada ka soo noqdey)

## Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.
8. Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.
9. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Gudidda Nabadsugida iyo Nabadsugida.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iy Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii iyo masuuliyiintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

### **Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.**

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro.

Guddida Joogtada iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee xil-gudashada hawlaha qaran, iyadoo ka duulaysa muhiimada ay leeyihiin hawlaha qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaani Ee Dawlada, Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida.

### **Waxay kulamo Xog-Waraysi Guddidu la yeelatay.**

- Hay'ada Dhawrista Tayada Jsl 14/1/2020
- Wasiirka Wasaaradda Waxbarashadda Iyo Sayniska Jsl 18/1/2020
- Guddida Qandaraasyada Qaranka Jsl 25/01/2020
- Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta 28/01/2020
- Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta Iyo Tiknoolijiyadda Jsl 1/02/2020
- Gudoomiyaha Baanka Dhexe Jsl 4/1/2020
- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha Jsl 5/2/2020

### **Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka**

Guddida Garsoorka, Cadaalada, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka oo ka mid ah Guddiyada Golaha Wakiilada iyadoo uga wakiil ah Golaha curinta iyo dib u eegista Xeerarka ka yimaada xukuumada ee khuseeya arimaha Garsoorka, Cadaalada, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka.



Kal-fadhigii 41<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada waxay Guddidu iyada oo dardargalinaysa hawlaheeda shaqo ee ay u xilsaaran tahay sida uu dhigayo xeer-hoosaadka Golaha wakiiladu Markay Taariikhdu ahayd 12-11-2019-ka waxay Kulan Hawleed lagu gor-faynayo qodobada qabyo qoraalka Xeerka Garyaqaanka, iyada oo ay xeerkaa u soo gudbiyeen Gole waynaha lana ansixiyay.

### **Guddida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada**

Kal-fadhigii 41<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada waxyaabihii guddida u qabsoomay waxaa ka mid ahaa:-

19/11/2019 ku wareejiyay Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2020-ka ka dib markii Wasiirka Maaliyadu Warbixinta Miisaaniyada Golaha ka hor akhriyay, Waxayna Guddidu Dhaqaaluhu Warbixinteeda Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2020-ka Golaha ku soo celisay 25/11/2019.

**Sidoo kale waxay Guddidu safar Shaqo ugu Bexeen Gobolada Bariga iyo Galbeedka.**

**Safaradii Guddida ee Gobolka Saaxil:-** Guddidu waxay Iyadoo oo kormeeraysa waxqabadka Kastamka Berbera si ay waxbadan uga ogaato uguna kurgasho xaalada Dhaqaale ee Dalka qiimayn balaadhana ugu samayso habka lo soo xareeyo Dhakhliga

**Guddidu waxay Kulan la yeelatay intii ay joogtay Kastamka Berbera; -**

- Mareeyaha Dekeda Berbera.
- Maamulaha Kastamka Cashuuraha beriga ee Berbera.
- Badhasaabka Gobolka Saaxil.
- Isu-duwayaasha Gobolka Saaxil.

Dhanka kale waxa ay Guddidu kulan xog-waraysi la yeelatay Wasiirka Wasaarada Maaliyada **Dr. Sacad Cali Shire** kaas oo lagu falaanqeeyay misaaniyada Qaranka Sannadka **2020-ga** ee soo socda sidii looga baarandagi lahaa iyo sidii loo odorosi lahaa iyada oo la is kaashanayo.

**Sidoo kale markay taariikhdu ahay 25/11/ 2019** Waxa ay guddidu Gola waynaha u soo Gudbisay warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2020-ka.

### **Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah**

**30/11/2019** Guddida Degaanka iyo khayraadka Dabiicigu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Hormarinta Beeraha **Md. Axmed Muunin Seed** kulankaas oo ka dhacay xafiiska Guddida ee Xarunta Golaha Wakiilada.

### **Guddida Arimaha Bulshad iyo diinta**

Guddida Arrimaha Bulshado iyo Diinta ee Golaha Wakiiladu waxay kal-fadhigii 41aad ka soo talo bixisay Wasiirka wasaarada wax barashada, Sayniska iyo Tignoolajiyada iyo Wasiir kuxigeenka Wasaarada Waxbarashada Sayniska iyo Tignoolajiyada oo ay Golaha u soo gudbisay si loogu ansixiyo xilalka uu Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland u soo magacaabay.

## Guddida Arimaha Gudaha iyo Nabadgelyada

**28/11/2019** Guddida Arrimaha Gudaha Difaaca Iyo nabadgalyadu waxay La kulantay Taliyaha Ciidanka Booliska iyo Maayirka Caasimada Hargeisa, kulankaas oo ka dhacay Xarunta Golaha Wakiilada.

Guddida Arrimaha Gudaha Difaaca Iyo nabadgalyadu waxa ay Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidanka Qaranka.

**12/11/2019** Gudiddu waxay ay ka soo Talo bixiyeen Gudidda Doorasha Qaranka oo ay Golaha u soo gudbiyeen si loo ansixiyo.

## Guddida Hawlaha Guud iyo Gaadiidka

**25-27 Aug 2019**, Guddidu iyagoo guddanaysa waajibaadkooda xeer-hoosaadka Golaha wakiiladu siiyey , waxay kormeer ku tagtay Gobolada Gabiley iyo Awdal, kormeerkaas oo ujeedadiisu ahayd u kuur-gelida xaaladda wadooyinka goboladaas.

Waxayna hubiyeen xog-ogaalna u noqdeen wadooyinka dhismahoodu hadda ka socdo iyo kuwa dhamaaday ee labadaas Gobol iyo wadooyinka isku xidhaba.



Sidoo Kale Guddidu waxay kulan la yeelatay Badhasaab ku xigeenka gobolka Awdal, waxayna soo kormeereen biriishka isku xidha magaalada Boorama iyo jaamacadda Cammuud, kaas dhismihiisu socdo, waxaana guddida warbixin ka siiyey **Prof Saleebaan Cabdi Guuleed**.

Ugu Danbayntii Guddida Waxay kulan la qaateen Maayirka Magaalada Boorama Mudane **Saleeban Xasan Xaddi**.

## Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

**02/12/2019** Gudidda Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranku waxay warbixinta xisaab xidhka 2017-ka u gudbiyeen Golaha, iyada oo warbixintaasi koobsanaysay warbixinta Hanti dhawrka guud ee Qaranka, iyada oo Goluhu ansixiyey xisaab xidhkaas.

**29/01/2020** Gudidda Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranku waxay safar ku tageen Gobolka Awdal, Saaxil iyo Togdheer, iyadda oo u jeedada safarkaasi ahayd kormeerka mashaariicdii ku jirtay xisaabxidhkii 2018-ka ee laga fuliyey Gobolada dalka.



Sidoo kale waxay Guddidu kulamo la yeelatay hay'adaha kala duwan ee ka hawlgala Goboladaasi.

**Gobolka Awdal**, Duqa Degmada Boorama, Guddoomiyaha Gobolka, Isuduwaha Waxbarashada ee Gobolka, Agaasimaha Cashuuraha Barriga ee Gobolka iyo Guddoomiyaha Jaamacada Camuud

**Gobolka Saaxil**, Somaliland Port Authority, Duqa Degmada Berbera, Shirkada iyo dhismaha Dekedda cusub ee Berbera, Kaydka Haamaha Shidaalka Berbera iyo Isuduwaha Wasaaraddab Xanaanada Xoolaha iyo kalluumayisga



Intii Guddidu ku sugnayd Gobolka Togdheer waxay kormeereen dhawr hay'adood oo kala;- Wasaaradda Waxbarashada ee Gobolka, Wasaaradda Ciyaaraha ee Gobolka, Ciidanka Damdamiska ee Gobolka iyo Wasaaradda hawlaha Guud, dhulka iyo Guryeynta ee Gobolka.

### **Gudidda Nabadsugida iyo Difaaca**

**20-23 November 2019-ka :-** Waxay Gudidda dibaafa iyo nabadsugidu safar ugu baxday Gobolka Awdal, safarkaas oo u jeedadiisu ahayd sidii ay u soo kormeeri lahaayeen xaalada Nabad-galyo ee Gobolkaas ugu horay waxaa soo dhaweeyay gudidda Maayirka Magaalada Boorame, waxayna xafiiska maayirka kula kulmeen masuuliyiinta kala ah;

- Taliyaha Sirdoonka Siciid Rooble Xaleed.
- Taliyaha Ciidanka Asluubta Siciid Xuseen Caynaan.
- Maayirka Boorame Saleebaan Xasan Xadi.
- Badhisaabka Gobolka Awdal C/raxmaan Ahmed Cali

## Wufuudii Golaha yimi.

**20-October 2019** Gudoomiyaha Golaha wakiilada Jamhuuriyada Somaliland **Md. Baasha Maxamed Faarax** ayaa waxaa uu kulan la qaatay Safiirka Midawga yurub (EU) u qaabilsan Somaliland iyo Somalia **Ambassador Nicolas Berlanga Martinez** oo uu wehelinayay Ambassador Staffan Tillander, kulan kaas oo ka dhacay xarunta Golaha wakiilada.

Kulankan ayay labada dhinac kaga wada hadleen Arimaha u diyaar garowga doorashooyinka Aqalka wakiilada iyo golayaasha deegaanka ee fooda inagu soo haya iyo sidii looga wada shaqayn lahaa fududaynta waxyaabaha ku xeeran iyo caqabadaha ilaa hadda Taagan.




Waxa oo ay ka wada-hadleen Arimaha Geeska iyo Gobolka ka jira iyo sidii looga wada shaqayn lahaa horumarka socdana qayb looga noqon lahaa.

Sidoo kale Weftigan ayaa xarunta Golaha kulan kula yeeshay Gudida Aragti wadaagta kootada Haweenka iyo beelaha laga tirade badan yahay oo uu gudoomiye u yahay Mudane Ibraahim Mahdi Buubaa waxaanay isku afgarteen sii xoojinta iyo hirgelinta qadiyada Haweenka in loo fududeeyo sidii ay uga mid noqon lahaayeen Golayaasha Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiilada), waxaanay isla garteen in taa lagu gaadhi karo in loo qoondeeyo kuraas u gaar noqota.

## Safaradii Dibadda loogu baxay.

### **Gudoomiyaha Golaha Wakiilada oo Safar ku tagay Dalka Djabuuti**

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Baashe Mohamed Faarax, oo safar shaqo ugu baxay dalka aynu Jaarka nahay ee Djibouti ayaa 16 February kulan la yeeshay Gudoomiyaha Baarlamaanka Dalka, Gudoomiyaha oo uu weheliyo xoghayaha saddexaad ee Safaarada somaliland ee Djibouti, Khadar Bedel Saed ayaa kulan muddo qaatay waxa uu la yeeshay Gudoomiyaha Barlamaanka Djibouti Md. Mohamed Ali houmed, oo ay weheliyan Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibadda Xildhibaan Abdirahmaan Awaleh Yasiin iyo Xubin ka mida Gudidda Dhaqaalaha Baarlamaanka Dalkaas.



Kulankan ayay labada dhinac kaga wada hadleen Danaha labada dal iyo sidii ay isugu xidhmi lahaayeen labada Baarlamaan ee labada dal ee Somaliland iyo Djibouti lana xoojiyo xidhiidhkooda wallaalnimo iyo wax wada qabsi, isla markaana ay is waydaarsadaan Khibradaha iyo habmaamulka labada Baarlamaan taas oo ay labada Gudoomiye Baarlamaan isku afgarteen iskulana qaateen in hore loo sii wada wada shaqayntooda.





## Mudanayaasha Golaha ka geeriyooday.

Waxaa Golaha ka geeriyooday Ilaahey ha u naxariistee **Md. Axmed Cabdi Kaahin** bishu markay ahayd 23/01/2015 ku geeriyooday magaalada Hargeysa laguna aasay Ilaahey Janadii Fardowsaha ka waraabiyo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada.**